

# **AFRAX: XILKAS KAALIN GALAY**

Nov. 09, 2021

© 2021

Cabdiraxmaan Yuusuf  
Siciid-Beegsi Maxamed  
Cabdicasiis Guudcadde

Magan I. M.  
Saxardiid Axmed  
Jaamac Galdegsi

## Arar

Sida uu qabo qoraaga iyo saxafiga reer Nayjeeriya, Abubakar Aadan, "Marka [waxqabadka suugaaneed] la faafiyo ama dadweynaha loo bandhigo," loo ma baahna in uu qoraagu "difaaco ama u qiil dayo" sababtii iyo nuxurkii uu u qoray. "Waxqabadku waa in uu isu hadlaa, waayo marka aynu wax qorayno xudduntu, ma aha nafteenna e, waa waxyaabahan aynu qornay."<sup>1</sup>

Tabtaas si u dhow ayuu Afrax qudhiisu uga cudurtaartay in uu ka sheekeeyo nuxurka iyo farriinta qisadiisa *Maana-faay*, mar magaalada Birminhaam bandhig loogu qabtay. Wuxuu ku adkaystay in aanay "arrin u taalla" ahayn in uu buugga ka hadlaa, oo taasi tahay hawl sugaysa dadka akhriya ee faaqida.<sup>2</sup> Labada qoraaba waxa ay u maragfurayaan in qoraaga waajibkiisu yahay qoritaanka, ee ayna masuuliyaddiisa ahayn in uu gorfayntana ku darsado oo wixii uu qoray uu sharraxo oo lafaguro: Qofku wax uu akhriyay buu gorfeeyaaye, wax uu qoray ma gorfeeyo!

Sababtaas baannu, annaga oo ka mid ah akhristayaashii Afrax, qoraalkan u agaasinnay. Waa dadaal aannu ku rabno in aannu ku gudanno xilka akhristaha. Sidoo kalana, lagu niyad san yahay in uu xus iyo weynayn u noqdo marxuun Maxamed Daahir Afrax (1952-2021).

Si, haddaba, aannu waajibkaa uga soo baxno, qoraalkani waxa uu akhrin guudmar ah iyo faallayn ku samaynayaa waxqabadyadii qornaa ee Afrax. Caqabad aan indhaha laga qarsan karin baa qoraalkan isku gudubtay: Qoraalladii Afrax dhammaantood la ma heli karo –qaar aan daabacnayn iyo kuwo saaxadda ka baxay bay isugu jiraan –sidoo kalana inta la hayo lagu ma soo koobi karo erayo u xaddidan sida qoraalkan. Xalka uu qoraalkani door

---

<sup>1</sup> An Interview With Abubakar Adam Ibrahim By Haneefah Abdulrahman, "Literature Humanizes People In A Way Journalism Does'nt." *Literature Voices*, Oct. 17, 2021. URL: <https://literaturevoices.com.ng/literature-humanizes-people-in-a-way-journalism-doesnt-an-interview-with-abubakar-adam-ibrahim-by-haneefah-abdulrahman/>

<sup>2</sup> "Qisada Buugga Maana-faay," *ABDI ASKARI TUBE*, Sept. 10, 2019, URL: <https://youtu.be/SxKgc-pS-ik>.

bidayaa waa in uu ku ekaado waxsoosaarkii Afrax intii uu ka gaadhay, diiraddana saaro daliilka loo heli karo in Afrax ahaa qoraa xilkas ah oo af iyo addinba u taagnaa horumarinta afka, dhaqanka, iyo aqoonta ummaddiisa.

## Gogoldhig

Maxamed Daahir Afrax wuxuu ahaa qoraa suugaanta allifa, sheekooyin daabacan iyo riwaayado leh; isla markaana faaqida fanka, gorfeyana waxsoosaarka halabuur ee dhiggiisa, siiba masraxa; suxufi iyo mutacallin daraaseeya dhaqanka iyo waayaha bulshada; raadna ku leh qalinka iyo halabuurka Soomaalida.

Wuxuu 1952<sup>kii</sup> ku dhashay Jarriiban, Mudug, Soomaaliya. Berigaa waxa lagu jiray xaalad kalaguur ah. Soomaalidu waxa ay u kala hayaamaysay noloshii reer miyinnimo, oo ah tii ay u badnayd ee soojireenka ahayd, iyo habnololeedka casriga ah. Dhanka kalana, waxa aloosnaa dhaqdhaqaaq gobannimaddoon, waxa ayna ummaddu isaga tallaabaysay labada hir ee gumaysi iyo xornimo.

Afrax, bilowgii tacliintiisa, dugsi laguma darin ee isaga ayaa loox qaatay oo hadba macallinka uu la kulmo xaraf ka xarriiqanayay, suuradna ka marsanayay, ilaa uu sidaas ku dhammeeyay jiska kowaad ee Quraanka. Dabadeedna, kolkii waalidkiisu ka garaabay dadaalkiisa mintidnimada ah iyo ilaa heerka uu aqoonta u xilqabo, malcaamad baa la qoray, wuxuuna Quraanka ku xafiday bilo lix ka yar – waa sababta ay ugu baxday naanaysta *Quraan-ka-adag*.

Muddo ka dib, isaga oo sagaal jir ah buu waalidkii ka qalqaalsaday, kuna qanciyay, in Muqdisho loo diro, si uu fursad ugu helo waxbarasho nidaamsan. Dugsiga hoose, dhexe, ilaa sare wuxuu ku dhigtay Muqdisho. Dadaalkiisuna wuxuu suuragaliyay in uu waxbarashadii iskuulka ku gebagebeeyo muddo ka yar sannadihii caadiga ahaa, sababta oo ah fasalka uu fadhiyo uun ku ma ekaan jirin ee waxa kale oo uu imtixaannada la geli jiray hadba galaaska ka sarreeya.<sup>3</sup> Jaamacadda Cadan ee dalka Yaman ayuu 1984<sup>kii</sup> ka qaatay shahaadada kowaad, isaga oo ka diyaariyay isbarbardhigga suugaanta iyo masraxa. Sannadkii 1990 ayuu dalka Ingiriiska u gudbay.

---

<sup>3</sup> Cabdifataax Nuur "Ashkir" (2020), "حوارتي مع رموز صومالية وأجنبية", bogagga 95-98.

Shahaadada sare ee PhD ayuu ka qaatay Jaamacadda SOAS ee Landhan, wuxuuna ku takhasusay suugaanta Soomaalida.<sup>4</sup>

Afrax intii uu dugsiga sare ku jiray buu bilaabay qoraalka. Wargeyskii *Xiddigta Oktoobar*, qaybtiisa Carabiga, ayuu sheekooyin iyo maqaallo ku faafin jiray – maaddaama: 1) aan berigaa fartan Soomaaligu degsanayn, 2) tacliintiisa asaasiga ahi Af Carabi ku baxaysay, sidoo kalana 3) *Xiddigta Oktoobar* ay keliya afafka Talyaaniga, Ingiriisiga, iyo Carabiga ku soo bixi jirtay wixii ka horreeyay Jan. 21, 1973.<sup>5</sup> Markii Far Soomaaliga la hirgeliyay, 1972, wuxuu hormuud ka noqday qalinleydii taabbagelisay adeegsiga farta ee bilowgiiba waxsoosaar macne leh ku qortay Af Soomaaliga (soosaarid wargeys, sheeko, maqaal ilaa buug) – sida aannu qaybaha danbe ee qoraalkan ku tusaalayn doonno. Maalintaa ilaa maantana, kaalin jidbixiyeennimo ayuu Afrax ku lahaa qoraalka Af Soomaaliga – halabuur suugaaneed iyo qoraal cilmi ahba (noofalkiisa *Maana-faay*, metelan, iyo buuggiisa faaqidaadda ah ee *Fan-masraxeedka Soomaalida*).

Nin yaraan ku kaalingalay buu ahaa, tacliinta ka sokowna garasho qumman iyo fahmo badnaan u dhashay, dadaal iyo kartina raacsaday. Taa maraggeedana waxa aynu kaga gaabsan karnaa: in uu shan jirkiisaba loox jiiday oo waxbarasho raacsaday; in uu Quraanka ku dhammeeyay wax ka yar lix bilood; iyo buuggiisa *Maana-faay*, ee aan kitaabka Quraanka ah waxba ka xajmi yarayn, in uu ku qoray wax ka yar laba bilood!

Tan iyo kolkii uu dab ka baydhay, wuxuu u kala geeddiyay gobollo, dalal iyo nololo kala duwan: miyi iyo reer magaalnimo, qurbe iyo qaxoontinnimo. Duruufahaa kala geddisan wuxuu ka taransaday waayo’aragnimo, aqoon, ogaal, luqad, lahad iyo bisayl qofnimo... Dabadeed waxa samaysmay Afrax ka coker hiddaha iyo casrigaba, raacdeeyana gobannimo ummadeed iyo ilbaxnimo dhaqan; iyo samaddoon qalinkiiisu u sahan tago tanaadka ummadeed ee ku aaddan feker, dhaqan, aqoon, siyaasad, taariikh iyo fanba. Samaddoonnimadiisa iyo ilbixintiisuna ku ma ekayn eraygiisa qoran ee

---

<sup>4</sup> Cilmibaadhista uu PhD ku qaatay wuxuu cinwaankeedu ahaa *Between Continuity and Innovation: Transitional Nature of Post-independence Somali Poetry and Drama 1960s – the Present*. Waa daraasaddii u horreysay ee ifisay in suugaanta Soomaalida ee Gobannimada ka dib ay yeelatay weji kalaguur ah oo u dhexeeya sidii la isugu miisaami lahaa, maaddaama dowladnimo la galay, dhaqankii soojireenka ahaa iyo waayaha casriga ah. Waxa xilligan ka muuqda, ayay cilmibaadhistu ku doodday, suugaantii afka uun laga gudbin jiray oo qoraal u guurtay, hiddihii degelkiisa ku koobnaa oo caalamka u furmay, iyo wax kasta oo isbeddel ah oo ay wadatay nolosha magaaloobiddu.

<sup>5</sup> Taariikhda *Xiddigta Oktoobar* ka sii fiiri buugga *Qalabka Warfaafinta* ee ay 1976 soo saartay Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha, bogagga 30-31.

mararka qaar buu addinna ku darayay, sida waxqabadkiisa laga dheehan karo.

Halabuurka Afrax waxa dhaqaajinayay oo shidaalinayay, sida uu qudhiisu cabbiray, “damiir damqada.”<sup>6</sup> Hadba qodob dareen leh oo qalbigiisa huriya, maankiisana cariya, ayaa qoraalkiisa dararin jiray. Qalinkaa miigga ee damiirku hagayo, ee aan ka gabban tilmaanta mushkiladaha bulsheed ama siyaasadeed, wuxuu Afrax ku mutay xabsi, cabbudhin iyo debedmeernimo siyaasadeed. Tusaale ahaan, sannadkii 1980, markii uu bilaabay sheekadiisii *Galti-macruuf*, ee qaybtii 37<sup>aad</sup> ay wargeyska dowladda ku soo baxday, ayaa la mamnuucay isagana la xidhay. Markii la soo daayayna, dalkaba wuu ka cararay.<sup>7</sup>

Labaatankii sano ee u danbeeyay noloshiisa, Afrax wuxuu u badnaa Jabbuuti iyo Muqdisho, isaga oo qayb ka ahaa dadaallada dhismaha dowladnimo ee Soomaalida. Alle ha u naxariisto e, wuxuu magaalada Landhan, carriga Ingiriiska, ku xijaabtay 09. 10. 2021 –iyadoo ay afartan jirsatay sheekadiisii *Maana-faay* (1981).

Haddaba, waaxaha danbe ee qoraalkeennan waxa aynu ku eegi doonnaa kaalintii Afrax ee horumarinta qoraalka Af Soomaaliga, dhaqanka, fanka iyo suugaanta; iyo, welibana, samaddoonimadii iyo doorkii qalinkiiisa ee u jidbixinta cilladaha bulshada. Si taasi u suuragashana, waxa aynu faallayn doonnaa qaybo ka mid ah waxqabadyadiisa qoran.

---

<sup>6</sup> Ka daawo: “Qisada Buugga Maana-faay,” *ABDI ASKARI TUBE*, Sept. 10, 2019, URL: <https://youtu.be/SxKgg-pS-ik>.

<sup>7</sup> Abshir Maxamed Axmed (Bukhaari), “Waayihii Dr. Maxamed Dahir Afrax: Xusuus Toolmoon iyo Raad aan Tirmeyn,” *Wardheer News*, Oct. 26, 2021. URL: <https://wardheernews.com/waayihii-dr-maxamed-dahir-afra-xusuus-toolmoon-iyo-raad-aan-tirmeyn/>

## Afrax iyo Afka

“Afkeenna Hooyo waa jiritaankeenna. Waa aayaha ubadkeenna.”

M D Afrax

Afku waa adhxaxda dhaqanka, dhaqankuna waa summadda jiritaanka ummadeed lagu yaqiinsado. Waa rukun weyn oo ay ku tiirsan yihiin dhammaan astaamaha qeexa jiritaanka mujtamac kasta, sida caadooyin, fikrado, iyo fan. Afku waa halbowlaha waraabiya xididka uu jiritaanka bulsho ka tallaalan yahay. Ummaddii afkeedu hagaaso, ee uu noqdo mid aan jaanta la qaadi karin afafka nool ee uumiyaha kale, adhxaxda ayay ka jabtaa. Sidaa darteed, garashada hagaagsani waa ay qiyaasi kartaa inta uu la’eg yahay xilka bulsho walba ka saaran ilaalinta, horumarinta iyo hodminta afkeeda.

Af Soomaaligu waa af tabaadi ah oo hodannimadiisu la miisaan tahay ta ku dheehan murtida iyo suugaanta uu xambaarsan yahay. Tan waxa maraggeeda furay aqoonyahanno sokeeye iyo shisheeyaba ah. “Waa af hodan ah oo soojiidasho leh,”<sup>8</sup> ayuu yidhi Georgi Kapchits oo ka mid ah shisheeyaha bartay, baadhay, una dhaadhacay dhuuxa hoose ee murtida Soomaalida. Barta ay hodannimada u weyn ee Af Soomaaligu taallaa waa suugaantiisa dhexdeeda. Waa kii Macallin Guush, Andrzejewski, kolkii ay naftu ka gurmaysay, Soomaalida ku sagootiyay, “Waxaad tihiin ummad weyn, waanad tihiin dad hibo leh.”<sup>9</sup> Hibada uu Macallin Guush Soomaalida ku majeertay waa ta uu afkeedu xambaarsan yahay ee maanso iyo murti kalaba ah.

Laakiin sooyaalka hore ee nolosheenna ka ma muuqdo wax raad ah oo marag u noqon kara in aynu ahayn ummad ku baraarugsan xilka ka saaran ilaalinta iyo koolkoolinta afkeeda hodanka ah ee suugaantu udubdhexaadka u tahay. Tan sababteeda waxa aynu ku fasiri karnaa in aynu waqtigaa ahayn

---

<sup>8</sup> “Hal-Aqoon oo Waraysi la Yeeshay Dr. Georgi Kapchits,” *Hal-aqoon*, xidhmada 2aad, tirsiga 1aad, 2002.

<sup>9</sup> “Dardaarankii Macallin Guush,” *Hal-abuur*, xidhmadii 1, tirsi 4, gu’ 1995.



bulsho aanu afkeedu qoraal lahayn. Af aan qoraal lahayn, sida ay na la tahay, waa ay adag tahay in la koolkooliyo oo boodhka laga tumo erayadiisa sii dabargo'aya ee ku galbanaya godkii ay ku hoydeen dadkii maalinlaha u adeegsan jiray.

Caano daatay dabadood la qabay ee, Af Soomaaliga in loo yeelo far lagu qoro oo rasmi ah waxa sannadkii 1972<sup>kii</sup> go'aamiyay oo fulintiisana ku dhiirraday taliskii Kacaanka Soomaaliya. M D Afrax oo waqtigaa barbaar ahaa wuxuu ka mid ahaa farakutiris u jeellanaa afkooda oo yeesha far rasmi ah. Tan waxa inooga marag ah in Afrax kolkii hirgelinta farta Soomaaliga laga joogay muddo ka yar lixdan maalmood uu noqday qofkii u horreeyay ee soo saara wargeys madax bannaan oo ku qoran Af Soomaali fartiisu tahay tan la hirgeliyay.<sup>10</sup> Wargeyskaasi *Codka Jubba* ayuu ahaa, oo uu 1972<sup>kii</sup> ku asaasay magaalada Kismaanyo, Af Carabi iyo Af Soomaaliga ku soo bixi jiray.

Si la mid ah sidii uu taliska Kacaanku ugu dhiirraday fulinta go'aankii uu ku hirgeliyay Far Soomaaliga ayuu Afrax ugu dhiirraday in uu wax ku qoro oo fekerkiisa ku fidiyo Af Soomaali. Wax laga yaxyaxo iyo ceeb bay la ahayd in afkiisa hodanka ah oo leh far rasmi ah uu ka doorbido in uu af qalaad wax ku qoro. Isaga oo ay abbaartiisu tahay rag ka cudurdaartay, oo ku dhiirran waayay in ay Af Soomaaliga oo ah afkooda hooyo wax ku qoraan, oo doortay mid qalaad, wuxuu Afrax beri hore yidhi, "Afaf dadkii lahaa guteen xilkii ka saarnaa horumarintooda ilaa intee bay [i]noo noqon karayaan gabbaad aan uga indha-qarsanno kii hooyadeen [in]nagu anqarisay oo ah kan keliyee ay nagu fahmi karto?"<sup>11</sup>

Afrax ku ma dhiirran oo qudha in uu afkiisa farta yeeshay ku allifo sheekooyin, sida sheekada *Guur-ku-sheeg* (1975), kuna soo bandhigo fikrado, ee sidoo kale wuxuu u babacdhigay in uu daaha ka faydo in Af Soomaaligu yahay af cudud u leh in uu gudbiyo aqoonta castriga ah. Waa kolkii uu toddobaatannadii bilaabay in uu Af Soomaali ku qoro faaqidaad majare cilmi ah raacaysa oo faallaynaysa fanka masraxa Soomaalida. Faaqidaaddan oo waqtigaa si goosgoos ah u soo bixi jirtay, waa tii kolkii danbe noqotay buug muggii: buugga *Fan-masraxeedka Soomaalida*.

Afrax wuxuu qabay in cawska jiilaal ee lamahuraanka ahi uu kol walba yahay afkiisa hooyo, ummaddiisana adeegsigiisu waajib ku yahay – iyo darsiddiisa iyo kobcintiisuba. Wuxuu rumaysnaa in macnaha uu eray qalaad xambaarsan yahay eray Af Soomaali ah oo qaadi kara la heli karo ama la tidci

---

<sup>10</sup> AGA, "Kumuu ahaa Qoraagii ugu Horeeyay ee Af-Soomaali wax ku Qora," Oct. 5, 2018. URL: <https://aga.so/so/kumuu-ahaa-qoraagii-ugu-horeeyay-ee-af-soomaali-wax-ku-qora/>

<sup>11</sup> *Fan-masraxeedka Soomaalida*, bogagga vi-xix.

karo. Metelan, buuggiisa *Fan-masraxeedka Soomaalida* wuxuu ku dhex adeegsaday erayo firkoodu Soomaali yahay, iyo qaar dhalan Soomaaliyeed yeeshay, oo uu ku beegay kuwo qalaad, oo aynu tusaale u soo qaadan karno saddexda eray ee faaqidaad, fan-masraxeed iyo hagid oo uu ku toosiyay: *criticism, dramatic art* iyo *directing*. Kolkii uu Afrax sidan yeelayay waxa hubanti ah in uu ka war hayay in turjumidda qummani ay afka baaxaddiisa waasiciso, isla kolkaana waxtar ku biiriso.

Kolkii wax qaran u egi uu 1991<sup>kii</sup> ka burburay Soomaalidii Jamhuuriyadda, Afrax wuxuu u ambabaxay oo xil kii hore ka weyn iska saaray daryeelka afkiisa iyo badbaadinta ummaddiisa. Wuxuu kaalinta ugu sarraysa ka qaatay dadaallo lagu abuuray madalo u darban ururinta, dhaqaalaynta iyo darsidda dhaqanka, afka iyo suugaanta ummaddiisa: *Hal-abuur*, 1993; *Somali PEN*, 1996; *AGA*, 2012.

### *Hal-abuur*

*Hal-abuur* jariirad bay ahayd dhalatay xilli Soomaalidii Jamhuuriyaddu—ee qaran la’aanta iyo qaxarka is badday ama la baday—si filiqsan uga qaxayeen dhulkooda, oo ay si habqan ah ugu dhex daadanayeen carro shisheeye oo dalalka dariska la ah Soomaalida iyo kuwa fog ee Reer Galbeedku ka mid yihiin. M D Afrax oo ku baraarugsan in baabba’a isir, af, anshax, fan, ama guud ahaan dhaqan, ee bulsho ku habsadaa uu ka eedaad iyo eel daran yahay wax kasta oo kale oo burbura, wuxuu xagaagii 1993<sup>kii</sup> suunka u giijistay sidii uu u abaabuli lahaa una samayn lahaa madal lagu faalleeyo laguna bandhigo dhaqanka, suugaanta iyo hiddaha dadkiisan daadduumay.

Ujeeddada uu Afrax *Hal-abuur* u abaabulayay ma ahayn oo qudha in jariidaddani noqoto mid lagu tukubiyo dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida oo lagaga jiro dhaqanhabow kasta oo sababi kara dhaqanguur, ee macnaha taa ku lammaani waxa uu ahaa in bulshada Soomaalida (ee u kala dhanbalantay in quus la dhex yoxoobta dal burburay, iyo in kale oo dacallada dunida abaaraysa) la haleeshiiyo is’ahaantii iyo wax wada qabiddii hiddaha u ahaa. Ulajeeddada saddexaad ee aynu malayn karno in *Hal-abuur* loo unkay, ee labadaa hore si dadban ugu tolani, waa in bulshada Soomaalida dhexdeeda lagu abqaalo caadada akhriska iyo qoraalka—oo in ay tahay bulsho u qalanta in ay sadkeeda ka mutaysato ilbaxnimo wal oo bulshooyinka dunida ka dhex hanaqaadda, oo dabcan ay qoraalka iyo akhrisku laxaad u yihiin, nafsaddeeda jabtay looga dhigo jal.

Afrax in uu helo cid uu la miciinsado qotominta dhidibbada *Hal-abuur* ku ma uu nasiib darraan, ee col aan tiradiisu yarayn oo Soomaali iyo shisheeye isugu jira ayaa gacan weyn ku siiyay sidii wargeyskani u noqon lahaa meel lagu ururiyo suugaanta, afka iyo dhaqanka Soomaalida isla jeerkaana lagu lafaguro oo lagu faafiyo. Waxgaradka uu Afrax hawshan ku tabaabusheeyay ee la dadaalgalay, ee kol danbana golaha talabixinta *Hal-abuur* ku midoobay, waxa ka mid ahaa Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi), Professor B. W. Andrzejewski, Siciid Jaamac Xuseen, iyo Siciid Saalax Axmed oo baarka sare kaga jiray lodkii hiddaha, dhaqanka, afka iyo suugaanta Soomaalida ogaalka weyn u lahaa.

In *Hal-abuur* oo ahaa wargeys laba'afle ah oo Af Soomaali iyo Ingiriisi wada socda ku soo bixi jiray la isu duwo oo la hoggaamiyaa hawl dhayal ah ma ay ahayn, ee mid inta uu Afrax guntiga u gaabsaday uu fulinteeda dhexda u xidhay bay ahayd. Waa wax dhici kara in aad is wayddiiso sababta loogu baahday afka qalaad ee Ingiriisiga, maaddaama oo danta *Hal-abuur* loo sameeyay tahay mid Soomaaliyeed. Afrax oo malaha kasha ku hayay in cidii uun tan isa su'aali doonto ayaa sidan u sababeeyay: "Af Ingiriisigana waxa looga maarmi waayay ujeeddooyinka ay ka midka yihiin in dunida dibadda ee indheheedu Soomaaliya ku jeedaan la tuso sawirka runta ah ee dadka Soomaaliyeed iyo dhaqankooda, sawirkaas oo ka duwan kan aad u foosha xun ee beryahan lagu fidiyo qalabka warfaafinta dunida."<sup>12</sup>

Sidaas bay M D Afrax iyo saaxiibbadii, oo dabcan uu isagu horkacayo, ku hirgeliyeen *Hal-abuur* oo dhabtii xilli Soomaalida arrimaheedu aad u kala quban yihiin noqday wargeys kaalin weyn oo togan ka cayaaray ururinta iyo falanqaynta arrimaha Soomaalida, gaar ahaan dhaqanka, afka, iyo suugaanta.

*Hal-abuur* wargeys xilliyeed saddexdii biloodba mar soo baxa ayuu ahaa. Dhaxalka madhaafaanka ah ee mar walba maskaxdeenna xusuusin doona waxtarkii iyo wixii uu Afrax bulshadiisa u galay buuna ka mid yahay.

### *Somali PEN*

Dadaallada kor u dhaafaya in aynu gacan keli ah shanteeda farood ku tirinno ee uu M D Afrax ugu hagarbaxay Af Soomaaliga waxa ka mid ah kii in muddo ah maskaxdiisa ka guuxayay<sup>13</sup> ee uu dabayaaqadii 1996<sup>kii</sup> hirgeliyay. Waa kii

---

<sup>12</sup> Erayga Tifaftirka, *Hal-abuur*, xidhamadii 1, Tr2&3, 1993/94.

<sup>13</sup> Sida ku xusan buugyare uu *Somali PEN* soo saaray 2010, M D Afrax in muddo ah ayay fikraddan hirgelinteedu maskaxdiisa ka guuxaysay.

uu dhidibbada ugu taagay *Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed (Somali PEN)*.

Tii Afrax kol walba maankiisa ku soo noqnoqonaysay ee ahayd tabtii Soomaalidu ku heli lahayd cid iyo cudud u xilsaaran ummuuraha afka, dhaqanka, iyo suugaanta Soomaalida ayaa kolkii Jamhuuriyaddu duntay sidii hore si ka daran u sii walbahaarisay. Dabadeed si baahidan badhkeed loo daboolo waa kii horkacay geyllankii lagu yagleelay jariiradda *Hal-abuur*. Laakiin baaxadda baahidan oo weyn darteed, oo ka ballaadhan inta *Hal-abuur* gudi karo, Afrax halkan ku ma hakan ee wuxuu kol kale u gijistay guntiga sidii uu u abuuri lahaa naadi u taagan fulinta qodobbadan hoose<sup>14</sup>:

1. Daryeelka iyo horumarinta Af Soomaaliga iyo halabuurkiisa— halabuurka qalinka iyo odhaahda;
2. Midaynta, dhiirrigelinta iyo daryeelka qalinleyda iyo halabuurka Soomaaliyeed oo ka kooban qorayaasha, warfidiyeenka iyo halabuurka fanka iyo suugaanta, kuwaas oo loo fududaynayo in ay hormuud u noqdaan badbaadinta, nabadaynta, horumarinta iyo isjeclaysiinta ummadda; iyo
3. Difaaca iyo ilaalinta xorriyaddooda feker.

Dunida inteeda badani haddii ay hay'ado iyo ururro u leedahay qabashada ummuuraha qodobbadan sare ku xusan, sabab kasta ha lahaato ee Soomaalidu dhankan wax tallaabo ah u ma ay qaadin. Laakiin Afrax oo, sida aynu soo xusnay, ahaa qof dhaaddan macnaha iyo muhiimadda ay arrintani leedahay wuxuu keenay xeeladdii lagu dhisi lahaa naadi ummaddiisa ugu qaybsan hawshan, taas oo ahayd sidii qalinleyda iyo halabuurka Soomaalidu unug ugu yeelan lahaayeen dalladda weyn ee *PEN International* oo ah urur caalami ah oo mideeya qorayaasha iyo halabuurka dunida.

Afrax oo waqtigan Landhan degganaa tallaabadii u horreysay ee uu xeeladdan ku fulinayay wuxuu u qaaday dhankii ay ka xigtay xarunta *PEN International* ee badhtamaha Landhan ku taallay. Danta uu subaxan xarunta *PEN* ugu kallahayay mid ummadeed bay ahayd ee tu gaar ah oo uu naftiisa oo qudha ugu danaynayay ma ahayn. Hawlwadeennadii xarunta fadhiiyay kolkii uu Afrax ka helay xog ku saabsan himiladii uu xambaarsanaa, wuxuu ku qanciyay in qalinleyda Af Soomaaligu ay unug ku yeelato dalladdan caalamiga ah ee *PEN International*.

---

<sup>14</sup> Ka eeg Somali PEN (2010), *Taariikhda iyo Waxqabadka Naadiga PEN*, Somali-Speaking Center, bogga 5.

Intaa dabadeed Afrax wuxuu u dhaqaaqay sidii uu tol isugu jira qalinley iyo abwaanno isugu duwi lahaa ee uu tiro soddon ah ugu qancin lahaa in ay saxeexaan axdigii lagu asaasayay *Somali PEN*; qodobkan oo hawshan fulinteeda sees u ahaa.

Labadii qof ee u horreeyay ee kolkii uu Afrax axdigan u bandhigay saxeexay waxa ay ahaayeen abwaan Hadraawi iyo qoraa Nuuraddiin Faarax, muddo dabadeedna tiradii soddonka ahayd baa taam noqotay. Sidaas baa lagu qotomiyay tiirkii u horreeyay ee *Somali PEN*—oo *PEN International* arjigii *Somali PEN* ku ansixiyay shirweyne sannadkii 1997<sup>kii</sup> uu ku lahaa magaalada Edinburgh, Scotland.

Ururka *Somali PEN* wuxuu noqday kii u horreeyay ee Soomaaliyeed ee u xilsaaran masuuliyadaha aynu kor ku soo qodobbaynay, taas oo ku suuragashay xilkasnimo weyn iyo xilgudasho uu Afrax la yimid saaxiibbadiina garab ku siiyeen.

Afrax, oo loo doortay guddoomiyihii u horreeyay ee *Somali PEN*, wuxuu ururka ku hoggaamiyay fulinta mabda'yadii loo asaasay. Sannadihii ku xigay kii la asaasay wuxuu *Somali PEN* abaabulay oo hirgeliyay hawlo aan faro yarayn: bandhigyo suugaaneed iyo kuwo buugeed, kulammo isugu jira qaar dhaqameed iyo kuwo gaar ah oo dad lagu barayay dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed—iyo in uu xusas u sameeyay halabuurro godgalay, iyo in uu u dhaqdhaqaaqay qalinley xadgudub loo gaystay.

#### *Akadeemiye Goboleedka Af Soomaaliga (AGA)*

Xilkasnimada aan hagrashada lahayn ee ruuxdiisa ku tallaalan baa Afrax kol walba u diidaysay in uu dhayalsado masuuliyadaha afkiisa, dhaqankiisa iyo guud ahaan ummaddiisa ka saaran. Waxa si gaar ah u gubayay xilka culus ee aanay jirin meel lagaga gabbadaa ee isaga iyo facii ka saaran afkooda. Kolka uu qod dhidbaba sidii uu ku kale u taagi lahaa bay himiladiisu ahayd. Taa darteed, dadaalladii is daba taxnaa ee uu qaarkood Afrax madiga ku ahaa qaarna hormuudka u ahaa, sida *Somali PEN*, waxa ka dhalatay baahida loo qabo in la helo madal Soomaaliyeed oo midaysa dadaallada ku saabsan hawlahaan ee ay dadka Soomaalida ahi meelaha kala duwan ka wadaan. Dabadeed halkaa waxa ka dhashay hindisihii lagu abuuri lahaa xarun cilmiyeed oo heer ummadeed ah una xilsaaran daryeelka iyo horumarinta Af Soomaaliga iyo suugaantiisa.

Hindisahan, oo dabcan uu M D Afrax diyaarintiisa iyo dhaqaajintiisa kaalin sare kaga jiray, waxa lagu soo bandhigay shir weyn oo ummadeed oo lagu xusayay afartanguurada hirgelintii farta Af Soomaaliga, kuna qabsoomay magaalada Jabbuuti sannadkii 2012<sup>kii</sup>. Isla shirkan bay madaxdii dowladaha degaannada Soomaalida kala metelayay, ee shirka ka qayb galayay, ku oggolaadeen hindihsii ay soo jeediyeen Afrax iyo saaxiibbadii.

Intaa dabadeed, Afrax wuxuu ka mid ahaa sagaal xubnood oo loo xulay in ay soo darsaan hannaanka ugu toosan ee *Akadeemiye Goboleedka Af Soomaaliga* loo yagleeli karo. Sagaalkan qof, oo sababta hawshan loogu igmaday ahayd in ay afka iyo suugaanta aqoon durugsan u leeyihiin, lix bilood dabadood bay keeneen khiddaddii lagu asaasay AGA.

Afrax oo loo doortay *Akadeemiye Goboleedka Af Soomaaliga* guddoomiyihiisu wuxuu hoggaanka akadeemiyaha ku horkacay gudashada mabda'yadii loo asaasay. Hawlahaa waxa ka mid ahaa wacyigelin iyo casharro ku saabsan qiimaha afka hooyo oo akadeemiyuhu u qabtay dad Soomaaliyeed, oo dal iyo debedba ku kala nool, oo u badan da'da ku jirta dugsiyada iyo jaamacadaha. Iyo tababarro qoraalka afka Soomaaliga dulucdoodu ahayd oo akadeemiyuhu siiyay dhallinyaro Soomaaliyeed. Sidoo kale, hawlaha muhiimka ah ee Afrax ku hoggaamiyay akadeemiyaha waxa ka mid ah abaabulka munaasabado lagu xusayay afka hooyo oo lagu beegay Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo.

Ta muhiimka iyo madhafaanka ah ee xusidda mudani waa in Afrax oo AGA ama *Somali PEN* wakiil ka ahi uu madax Soomaaliyeed, sida Geelle, si dadban iyo si toos ahba ugu baraarujiyay xilka "ay gabeen" ee dowladaha ay madaxda ka yihiin ka saaran dhawridda iyo horumarinta Af Soomaaliga.

In kasta oo aynu soo taxnay waxqabadyo uu Afrax agaasimay, kaalin horseed ahna kaga jiray, haddana ma ay wada ahayn qaar ceebkasaliim ah, oo iimo ka wada hufan—oo hawl bashar u kacay, sida la dhaho, "ma laakiin la'a!" Dhaliil kasta oo ay yeeshaanna, wuxuun baa looga faa'iidayaan doonaa in mustaqbalka casharro laga barto, si looga baydho godkii loo aqoonsaday in mar la iska qaniinay!<sup>15</sup>

Haddaba, si aynu ugu gudubno faaqidaadda iyo tusaalaynta kaalintaa aynu u qirnay Afrax, waxa aynu qaybaha danbe ee qoraalkan ugu tagaynaa sida

---

<sup>15</sup> Tusaale ahaan, eeg Ibraahin-Hawd Yuusuf, "Ururka Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed (Somali Pen) ma Xisbi Siyaasadeed baa?" *Wardbeer News*, Mar. 22, 2014. URL: <https://wardheernews.com/ururka-qalinleyda-iyo-halabuurka-soomaaliyeed-somali-pen-ma-xisbi-siyaasadeed-baa/>

waxqabadyadiisa—iyadoo dhinacyo kala geddisan laga istaagayo—loogu markhaati gashan karo in uu dhab ahaan ahaa, sidii aynu ku soo qeexnay, “jidbixiyeen.”

## Afrax iyo Metelaadda Dhaqanka

*Soomaalina macnaa lagu yaqaan meel ay joogtaba e  
Oo waa hiddaha noo macaan malab sidiisiye  
Mar kastana ma moogganine waa naga dhex muuqdaaye  
Wax ka mid ah annagu waa mamnuuc inan dad maagnaaye  
Waliba kii marooraan nidhaa 'maandhow naga daaye'  
Durba gawrac ku ma miijinnee waw miyirinnaaye  
Qoladaan maslaxaddaa tusneen maaro uga weynno  
Annagoon hadday muruq is bidi kaga mildhaawaynin  
Murugtaye dharbaaxaan indhaha kaga malaasnaaye!  
– Cabdillaahi M Dhodaan, "Ha Midowdo," 1974*

Dhodaan halkan wuxuu inoo sawirayaa in dhaqanka Soomaalida, guud ahaan, lafta kaga jiraa uu yahay mid intii karaankiisa ah ka fogaada gacankahadalka iyo camalxumada. Qofkii gardarrada wada ayaannu xataa “waar adyadda naga daa” ku daynaa, ayuu leeyahay. Wuxuu Dhodaan ina barayaa in dhaqanka intiisa hagaagsani Soomaalida farayso in “rag walaalow wax uu ku dhaamo” aan la helayn. Minki mindi lagu taagayna aanay naruuro ka dhalanayn. Jawaabta kululna la bixiyo KELIYA haddii laga fursan waayo oo qoladii maslaxaddaa la tusay aynu “maaro uga weynno.”

Haddaba, marka aynu rabno in aynu darisno sida Afrax uu qoraalladiisa ugu metelay dhaqanka Soomaalida—oo ah mawduuca aynu qaybtan ku faaqidaynno—bartan baa ah meel wax laga bilaabi karo. Isla qodobkaas Dhodaan carrabaabay ayuu Afrax ku dooday meelo kala duwanna ku soo qaatay. Wuxuu in badan muujiyay, isagoo caddaymo afeed iyo qaar taariikheedba ku bishlaya, in aanay wada run ahayn sawirka ay Reer Galbeedka iyo qoraayada la aragtida ahi—Soomaaliba ha ahaadeen e—ka bixiyaan dhaqanka Soomaalida guud ahaan, gaar ahaan midka xoolaraacatada. Waa fekradda sheegta in dhaqankaasi gebigiisuba ahaa mid qallafsan oo aan laga soo helayn wax boorrinaya nabad-jacayl, kaladdanbayn, dulqaad, iyo dhammaan isirrada taageera dhismaha. Taa beddelkeedana uu yahay dhaqan u janjeedha, oo ku camalfala, cunfiga, colaadda, diradiraha, belaaya'afuufnimada, iyo idil ahaan qodobbada burburka u adeega. Waa sawirka tashuusheeyay, ee lagu doodi karo in uu niyadjebiyay, dadaal kasta oo wax lagaga beddeli lahaa dhaqan-maalmeedka sirgacan ee siyaasadda iyo



saaxad kasta maanta ka calanwallaynaya. Tusaale ahaan, qofka qalalaasaha faraha kula jira ee ay ahayd in laga waaniyo waxa lagaga gaabsanayaa, marka sawirkan lagu eego, cudurdaar ah: waa dhaqankoodiye iska daaya!

Axmed Sheekh Cali baa 1977 arrintan taabtay. Wuxuu buuggiisa *Xeerkaa Soomaalidii Hore* ku xusay in Soomaalidu weligeed ahaan jirtay “dad dimoqraadiyadda ku dhaqma [oo] lahaan jiray xeer wanaagsan oo dimoqraadi ah oo ay wax ku qaybsan jireen.” Arrinta aynu u soconno muujinteeda ayuu qoraa Axmed buuggiisan ku sheegayaa marka uu naqdinayo wax uu u bixiyay “warxumadii isticmaarku qoray.”<sup>16</sup> Wuxuu ku tiiqtiqsanayaa in aanu lugo adag ku taagnayn fekerka gumaysiga iyo raacayaashiisu buunbuuniyaan ee sheegaya “in Soomaalida xeerkeedu ahaan jiray isdil, isdhac, isboob iyo kala aargoosi.” Wuxuuna suuradxumayntaa jawaab uga dhigay buuggiisaa kooban ee dulkaxaadiska ah.

Ha se yeesh ee Afrax sidaa hore si ka faahfaahsan buu arrintan isu dul taagay (in kasta oo aanu buug gaar ah mawduucan u gooniyayn). Tusaale ahaan, wuxuu baadhitaan ku sameeyay “ismaamul-hiddeedka Ciisaha” isagoo dul istaagaya Xeer Ciise.<sup>17</sup>

Sida Dhoodaan iyo Axmed Sheekhba abbaartooda lagala baxayo si la mid ah ayuu Afrax qabaa in marka Xeerkan la dhugto, la fahmayo “in ay been sheegayaan kuwa ku andacooda in ay guud ahaan xoola-dhaqatada, gaar ahaanna Soomaalidu, yihiin bulsho danbaysa oo aan awood u lahayn in ay hirgaliyaan ismaamul hore u marsan.” Sidoo kale, marka uu kala dhigdhigo ee u daadego “dunta” ismaamul-hiddeedkaas, ayuu Afrax ka soo gororinayaa casharro ay ka mid yihiin “[i]n ay jiri karto ilbaxnimo sare iyo dowladnimo ay taabba-galiso bulsho xoola-dhaqata ah, halkii hore la isaga dhaadhiciyay taasi in ay tahay arrin ay awood u leeyihiin oo keliya bulshooyinka deggan ama ku nagi beero iyo magaalooyin.”

Marka uu Afrax suuradxumayntaa deedifaynayo wuxuu innala doonayaa in aynu dhaqanka Soomaalida si xaqiiqo ah u abbaarno oo aynaan aqbalin dhaliil aanu lahayn oo lala beegsanayo (ama aynaan huursan ceebo uu leeyahay oo la qarsanayo). Edward Said wuxuu ku dooday in qoraayo badan oo gumaysiga ka danbeeyay (post-colonial) ay tagtadoodii (qofeed iyo ummadeedba) xambaarsan yihiin, taas oo ku ah “boogo wejigabax leh.”<sup>18</sup>

---

<sup>16</sup> Fiiri *Xeerkaa Soomaalidii Hore*, bogga 2 iyo wixii ka danbeeya.

<sup>17</sup> Fiiri maqaalkiisa “Dunta Ismaamul-hiddeedka Ciisaha” ee ku soo baxay majaladda *HAL-ABUUR*, xidhmadii 4aad, tirsiyadii 1&2, 2009.

<sup>18</sup> Fiiri maqaalkiisa “Intellectuals in the Post-Colonial World” ee ku soo baxay majaladda *Salmagundi*, No.70/71, 1986, bogga 55.

Taas oo ka dhigan in mar kasta oo ay arrimaha ummaddooda wax ka qorayaan ay u dhurtaan in ay isu ekaysiiyaan gumaystihii ka tagay. Waxa dabadeed la arkaa iyaga oo keliya arkaya boogihii tagtada ee waagii gumaystaha—“warxumadii isticmaarka”—oo kuwaa wax ku dul dhisaya. Laakiin marka aynu si xidhiidhsan u akhrinno waxqabadyadii hore ee Afrax, waxa aynu yaqiinsanaynaa in uu isagu jidkaa “warxumada” ka baydhay. Meelaha aynu ilaa hadda ka soo xigannay, waa qodobbo ina dareensiinaya sida uu, ugu horraynba, ugu baraarugsanaa in ay jiraan “been” iyo “wax la iska dhaadhiciyay” oo ku aaddan dhaqanka Soomaalida. Waana tallaabada kowaad, oo qof aan dhibta ku baraarugsanayni ka ma hortagi karo—hadday jirtana ma furdaamin karo.

Dhanka kale, wuxuu qoraalladiisa si qoto dheer ugu lafaguraa sida suuradxumayntaa uu ku baraarugay loo sixi karo. Tusaale ahaan, buugga 1994<sup>kii</sup> soo baxay ee *The Somali Challenge: From Catastrophe to Renewal*, wuxuu ku darsaday cutub<sup>19</sup> uu ku naqdinayo “habfekerka waqtigan” ee raadaynta weyn ku leh burburka iyo bayhoofka Soomaali badani la kulantay, iyo sida kaasi gebi ahaanba uga duwan yahay “soojireenkii karaamaysnaa ee Soomaalida” oo uu ku doodayo in markii aad looga durkay belaayadan laga danbarsaday. Marka abbaartiisa la soo koobo, waa sidan: Soomaalidu waxa ay lahayd hidde xeer iyo kaladdanbaynba leh oo guud ahaan boorriya ismaqalka, dulqaadka, iyo talawadaagga; dabadeed soomalhaad iyo sakaraad baa ku socday gumaystihii ilaa Kacaankii ilaa burburkii; dabadeed mushkiladda maanta taagani ka ma turjumayso in Soomaalidu “dhaqan xun tahay” ee waxa ay si cad u muujinaysaa in la dayriyay “dhaqankii miyirinta.” Si uu abbaartaa u gaadho, wuxuu adeegsanayaa, tabtii Axmed Sheekh Caliba yeelay, suugaanta afeed ee Soomaalida dhexdeeda ku filiqsan.

Marka uu sidaa falayo, wuu ogsoon yahay in Soomaalidu qayrkeed wax la qabto oo aan laga dhigi karin xalaydhalay. In, tusaale ahaan, dil iyo dhac iyo faldenbiyeedyo kale la geysan jiray, wuu ka garaabayaa. Intaa uun ku ma ekaanayee, wuu naqdinayaa. Bilmetel, “Haba kuu darraadee dad waa ina adeerkaa,” maahmaahda ina baraysa ayuu ku naqdinayaa halista iyo burburka ay sababi karto caqliyadda lagu saleeyaa. Taa beddelkeedana, maahmaahyaha tirabbeelka ah ee wax dhisaya ayuu xoojinayaa. Maahmaahda kore waxa ay inoo sheegaysaa in inaadeerkaa garabkaaga keliya yahay, sidaa darteed aad marleyba taageertid. Dhaqankaan aan garashada qumman ku dhisnayn waxa lagaga hortegi jiray, ayuu Afrax soo

---

<sup>19</sup> Cutubka 9aad, “The Mirror of Culture: Somali Dissolution Seen Through Oral Expression,” bogagga 233-251.

bandhigayaa, nidaam bulsheed/reereed oo ah in beeshu yeelato rukunno adadag oo “xidhe” noqda oo qabta nimanka gardarrada “gees biciid” u leh! Waxa lagu maahmaahi jiray, ayuu daliishanayaa qoraagu, in tolkuba ku dhaqmo saddex qodob: 1) nin qaldan qabashadii; 2) nin qumman quwayntii; iyo 3) nin qatan quudintii.

Dacalka kale, wuxuu darsayaa sheekaxariirooyinka Soomaalida, markaas buu xaqiiqsanayaa in shakhsiyadaha sharka u taagan ee suuradda xun sheekadu u yeelaysaa yihiin kuwa belaayawadka ah. Tusaale ahaan, Arraweelo iyo Geeddi-Baabbow ayuu qoraalkiisa “The Mirror of Culture” ku soo qaadanayaa. Sheekada Dhegdheer ayuu sidoo kale ku faaqidayaa meel kale.<sup>20</sup> Ujeeddada ugu weyn ee uu sheekooyinkan meelaha kala duwan ugu xusayaa waa in uu muujiyo in dhaqanka Soomaalidu aanu, si ka duwan ‘warxumada isticmaarka’, ahayn mid dhiirrigeliya oo xeer ka dhigta xumaanta ee uu ahaa kaa lidkiisa. Wuxuu ku doodayaa: iska daa maahmaah iyo suugaan tixaysan e, xataa tiraabtii iyo sheekaxariirooyinkii dhaqanka ayaa nagu barbaarinaya in aannu sharka intaannu shar u aqoonsanno ka digtoonaanno; ma jiro dhaqan Soomaaliyeed oo xumaantu sal u tahay.

Marka aynu isla akhrinno waxqabadyadaa hore ee Afrax (af uu ku qorayba), waxa aynu si dhab ah ugu qiraynaa in uu ka badbaaday canjilaadda luqaddii gumaystaha. Qofku afka uu doono wax ha ku qoro e, haddii uu ka run sheegayo, oo si fiican u metelayo, cidda/mawduuca uu wax ka qorayo, waxa aynu odhan karnaa wuu gutay xilkii la gudboonaa.

Intaa marka aynu meel ku hubsanno, waxa aynu taabanaynaa qodob kale oo xidhiidh la leh. Afrax wuxuu naqdiyay fekradda ku taamaysa in Soomaalidu tahay “Ummaddii gabayaaga—nation of poets.” Waa qeexitaan loo celiyo Richard Burton, sahankei gumaystaha, oo qarni iyo badh ka hor uu Soomaalida ku sifeeyay. Laakiin Afrax waa uu qawaday tilmaantaa. Wuxuu is wayddiiyay: Soomaalidu ma “Ummaddii Gabayga” uun baa, mise waa dad fanka oo idil wada jecel?<sup>21</sup> Wuxuu ka garaabayaa in gabaygu—iyo guud ahaan fanka erayga, ama maansada—bulshada Soomaaliyeed ku dhex leeyahay kaalin aan la yaraysan karin. Ha se yeeshee, ayuu ka soo reebayaa, taasi ka ma dhigna in qaybaha kala duwan ee suugaaneed iyo faneed ee kale aanay ummadda Soomaaliyeed u haynin qaddarin. Wuxuu caddaymo u raadinayaa—dabcan una soo helayaa—in qaybaha faneed/suugaaneed ee

---

<sup>20</sup> Fiiri buuggiisa (2020) نفاذة على الإبداع في منطقة خليج عدن: دراسات في الثقافة والفن في الصومال وجيبوتي واليمن Bogagga 31-33.

<sup>21</sup> Fiiri maqaalkiisa “‘Nation of Poets’ or Art-loving People? The Role of Literature in the Present-day Somali Society,” oo ku soo baxay majaladda *HAL-ABUUR*, xidhmadii I, tirsiyadii 2&3, 1993/94.

kale (sida masraxa iyo fanka sheekada) ay Soomaalida magaalooyinka deggan ku dhex leeyihiin qaddarin ka weyn midda maansadu guud ahaan maanta haysato. Wuxuu qirayaa in “gabaygii dhab ahaan dhintay.” Waa isla doodda uu Ibraahin-Hawd Yuusuf, oo ah qoraa iyo sheekacuriye kale oo miisaan weyn ku dhex leh fankan, curiska gaarka ah ka qoray toban sano ka dib tibaaxdaa Afrax, 2003.<sup>22</sup> Markaa, wuxuu Afrax sii wadayaa dood uu 1987 bilaabay markii uu qorayay buuggiisa wacdaraha leh ee *Fan-masraxeedka Soomaalida*. Waa fekradda ah in fanku, guud ahaan, aanu soogalooti ku ahayn Soomaalida. Tusaale ahaan, wuxuu aad u darsay fan-hiddeedka aadka qadiimka u ah ee Soomaalida. Wuxuu is dul taagayaa suugaan-hiddeedda raadkeeda laga dheehan karo in ay Soomaalidu ab iyo isir u leedahay, ee ay ciyaaraha iyo sheekaxariirooyinku ka midka yihiin. Wuxuu ku doodayaa in suugaan-hiddeeddu ay si dhab ah uga turjumayso dareenka iyo fekerka wadareed, maaddaama cid gaar ahi aanay curinteeda ku suntanayn. “Suugaantani waxay ahayd halabuur la wadaago, sidaa darteedna waxay si dhab ah u cabbiraysaa nafsadda wadareed,” ayuu qorayaa.<sup>23</sup> Sidaas oo kale, wuxuu qirayaa in suugaantu tahay “dhaxalka ugu qiimo sarreeya uguna hodansan ee laga hayo maskaxda Soomaalida, ka ab iyo ka awoowe.”<sup>24</sup> Dhanka kale, in kaydkaa iyo dhaxalkaa ummadeed la ururiyo oo la darso keliya shaqo u ma ay ahayn e, sidoo kale wuxuu dareensanaa in waajib weyni ka saaran yahay. Wuxuu afartameeyo sano ka hor qoray: “Haddaan la fahmin laguna xisaabtaamin saykolojiyadda bulshada iyo astaamaha gaarka ahe ummad ahaaneed...way adagtahay in la xalliyo arrimaha asaasiga u ah horumarinta bulshadaas. Darsidda dhaqanku ummuurtan ayay gacan weyn ka geysataa. .. Halkan ayey, qayb ahaan, ku jirtaa muhiimnimada dhaqanka ruuxiga ah ee udub-dhexaadkiisu yahay fanka iyo suugaanta, baahida loo qabo aruurinta, qoraal-ku-kaydinta, darsidda iyo hor-u-marinta tacab-maskaxeedkaas qaaliga ah.”<sup>25</sup>

Qodobbada ugu doora roon ee uu fan-hiddeedka darsiddiisa ku darsaday waxa ka mid ah sida uu u muujiyay in muusigga iyo fanka heesiddu aanay Soomaalida “dhowaansoobax” ku ahayn. Cilmi ahaan, wuxuu meelo kala duwan ku muujiyay in ciyaar dhaqameeddu tahay asalka fanka oo dhan.<sup>26</sup> (Waxa isla sidan qaba Axmed Cartan Xaange (1936-1993) oo qudhiisu

<sup>22</sup> Fiiri curiska Ibraahin-Hawd uu 2003 faafiyay ee “Gabaygii wuu Dhintay.”

<sup>23</sup> Fiiri نافذة على الإبداع, bogga 27.

<sup>24</sup> Fiiri Maxamed D Afrax, “Ifitiimin Suugaanta Soomaalida: waxa ay tahay, waxa ay tarto iyo waaxyaha ay ka koobanto,” AGA, *Deraasadibii Xuska 40-guurada Qorista Af-soomaaliga*, bogga 80.

<sup>25</sup> Fiiri *Fan-masraxeedka*, bogga xii.

<sup>26</sup> Tusaale ahaan fiiri نافذة على الإبداع, bogga 20.

bartay suugaanta).<sup>27</sup> Dabadeed wuxuu Afrax kala saarayaa beeraleyda iyo xoolaraacatada, oo muujinayaa in qolada hore hodan ku ahayd samaysashada qalabbada muusigga iyo sidoo kale noocyada kala geddisan ee ciyaar dhaqameedyada—sababtu waa in ay yihiin dad deggan oo waqti badan u helaya faakihaysi iyo halabuur. Halka xoolaraacatadu ay hodan ku tahay suugaan-afeedda, maaddaama ay dhacdo iyo baxdo socdaan oo noolayaasha iyo caalamyada ay la kulmayaan aad u badan yihiin, dabadeed ay u baahanayaan in ay weeleeyaan oo fanka eraygu dhexdooda ku xasilo.<sup>28</sup> Kolka uu innagu baraarujiiyo in fanka oo dhan aynu ehel u ahayn ilaa inta la hayo, ayuu xasuusanayaa in la kharribay dhadhansigaa oo hirar warxumasheeg ahi badaha shishadooda innagaga soo dooleen iskuna dayeen in ay jiritaankaa ummadeed wiiqaan. Dabadeed wuxuu inoogu laabqaboojinayaa: “Dookha dadka sida loo kharribi karo si le’eg baa loo toosin karaa!”<sup>29</sup> Taas buu dhab ahaan u taagnaa Afrax: in uu toosiyo dookha iyo habboonida faneed ee Soomaalida. Af kasta oo uu wax ku qorayna, arrintaas wuu joogteeyay—sida aynu soo muujinnay.

Ugu danbayntii, qaybtan waxa aynu ku soo gunaanadaynaa in uu halkan cashar weyni ugu jiro qoraayada iyo indheergaratada wax ka qoraya arrimaha dhaqameed ee Soomaalida. Ma aha in qofku ummaddiisa u guulwadeeyo oo xumaanta dhexdeeda taalla u qurxiyo; mana aha in uu, dhanka kale, eedaha aanay lahayn ee dusha lagaga soo tuuro iska aqbalo oo uu gorodda u laallaadsho, ciddii doontaa ha soo jeedisee. Waa se in uu wixii wanaag ummadeed ah ku faro adaygo oo waariyo, wixii ka khaldanna si ku habboon u naqdiyo. Laba-gooraalaba waa lexjeclo. Markaas baynu odhan karnaa qofkaasi qalinkaasi wuu ku metelay dhaqanka iyo ahaanshaha ummaddiisa. Nuxurka hadalkeennan waxa u sii maragfuraysa weedh uu Afrax qudhiisu ku soo koobay meelaha uu abbaari jiray, isagoo qisadiisa *Maana-faay* tusaale u soo qaadanaya. Wuxuu sheegay in ujeeddada ugu weyn ee uu sheekadaa u qoray ahayd in aanu huursan ee uu haawiyo oo saxo “waxyaabo dhaqankeenna ka soo jeeda oo aan nolosha casriga ah la jaanqaadayn” iyo “waxyaabo nolosha casriga ah la socday oo ah ilbaxnimadii

---

<sup>27</sup> Fiiri curiskiisa “Somali Folklore” ee ku soo baxay *Transactions of the Somali Academy of Sciences and Arts* (Volume I, 1987), bogagga 55-62.

<sup>28</sup> Fiiri *نافذة على الإبداع*, cutubka kowaad.

<sup>29</sup> Fiiri *Fan-masraxeedka*, bogga 107.

oo aynu si khaldan u fahannay.”<sup>30</sup> Mushkiladaha in uu furdaamintooda u tafaxaydnaana qaybta tan xigta ayaynu ku eegaynaa.

---

<sup>30</sup> Ka daawo: “Qisada Buugga Maana-faay,” *ABDI ASKARI TUBE*, Sept. 10, 2019, URL: <https://youtu.be/SxKgq-pS-ik>.

## **Afrax iyo Iftiiminta Mushkiladaha Soomaalida**

Qoraa Ameerikaan ah oo la yidhaahdo E. B. White ayaa mar isaga oo ka hadlaya doorka qoraaga waxa uu yidhi, “Qoraaga waa in laga dhex arko, oo uu fasiro, bulshadiisa iyo dunidiisa; waa inuu sidoo kale dhiirrigeliyo, hago, oo uu cariyo.” Haddii hadalkan la kala qaadqaado, qoraaga mar waxa lagu sheegi karaa inuu yahay muraayad ay bulshadiisa iyo duniduba qoraalkiisa iska dhex daawato, kaas oo, si la mid ah sida muraayadda caadiga ah, bulshada ka caawiya in ay aragto muuqaalka rasmiga ah, iyo in ay iska bi’iso hadba wixii foolxumo ah ee korkeeda ka muuqda. Mar labaad, waxa lagu tilmaami karaa turjumaan bulshadiisa iyo dunidiisa macneeya, oo dhaqannada, fekrada, ama arrimaha kale ee bulshadiisa, iyo dunidaba, ka dhex socda, isla markaana saamaynta ku leh, fahansiiya dadka aan fahansanayn, isla markaana inta fahansan qudhooda kol kale ku baraarujiya. Kol saddexaad, waxa qoraaga lagu tilmaami karaa inuu yahay qof bulshadiisa iyo caalamkaba samaha ku dhiirrigeliya, ku haga jidkii ay wanaaggaas u mari lahaayeen, isla markaana uga diga, kuna dhaliila, waxyaabaha xunxun ee ay waxyeelladu ka soo gaadheyso. Dabcan, tilmaamahani qoraaga oo keli ah gaar ku ma aha, masuuliyaddanina isaga uun ma saarna, ha se ahaatee waxa la wadaaga guud ahaan ‘gadhwadheenka fekerka’ oo—sida uu Afrax ku sheegayo buuggiisa *Dal Dad Waayey iyo Duni Damiir Beeshay*—ah cidda u xilsaaran qaabaynta feker-wadareedka bulshada. Guud ahaan tacliinleyda ayaa u xilsaaran in ay bulshada toosiyaan, dhibaatooyinka ku baraarujiyaan, uguna diga, isla markaana jidka wanaagsan ee horumarkeedu ku jiro ku duwaan.

Haddaba, sida aynu kor ku xusnay, qaybtan waxa aynu ku tilmaamaynaa mushkiladaha M D Afrax uu, isaga oo masuuliyadda kore ee aynu qoraaga, iyo guud ahaan gadhwadeenka fekerka, u saalinnay maskaxda ku haya, bulshada Soomaaliyeed ku baraarujinayo, kuwaas oo aynu qoraalladiisa ka dhex akhrisanayno; mushkiladaha oo uu dareensanaa—haddii aan la xallin oo inta indho midaysan lagu fiiriyo aan suulintooda la isu kaashan—inay aayo-xumo ummadda u horseedi doonaan, una geysan doonaan waxyeello ka weyn ta ay hadda badeen. Mararka qaarkood, si toos ah, oo uu qalinka ku adkaynayo, ayuu mushkiladahan uga digayaa, bulshadana ugu dhaliilayaa sida aanay suulintooda ugu darbanayn, meelna ugaga soo wada jeedin; marar kalana si dadban, bal se qoraallada lagala soo dhex baxayo, ayuu u soo bandhigayaa, dadkana u tusayaa. Sida la

malayn karo, dhibaatooyinka uu Afrax ka hadlayaa waxay isugu jiraan qaar caadyaal ah oo dadka badankooda u muuqda, si joogto ahna looga hadlo, qof aqoon leh iyo mid aan lahaynna xumaantooda isku wada raacsan yihiin; iyo qaar kale oo, in aan lagu wada baraarugsanayn ama in aan dhibaato loo wada arkayn ka ay doonto ha noqotee, in la soo qaadaa aanay carrabka dadka ku badnayn. Dhinaca kale, waxa ay mushkiladahaasi isugu dhafan yihiin kuwo bulsheed oo dhaqanka soojireenka ah iyo hiddaha ku daba leh, iyo qaar casrigu watay; iyo kuwo siyaasadeed oo dowladnimada iyo maamulka quseeya. Haddaba, aynu dhowr mushkiladaha ka mid ah hoos ku tilmaanno.

Cilladaha dhaqanka iyo hiddihii miyiga ka soo jeeda, isla markaana bulshada intii magaalada soo gashay ka daba yimi – iyaga oo dabcan bulshadii miyiga qudheedana sidii uga dhex jira – waxa ka mid ah qabyaaladda. Qabiilka ama tolka oo berigii hore qofka Soomaaliga ah kaalin muhiim ah ugu jiray, oo naftiisa iyo maalkiisuba ay ku ilaashanaayeen, markii dowladnimada casriga ah loo gudbay awooddiisii iyo muhiimaddiisii waxba iska ma ay dhimin; waabu sii xoogeystey. Halkii ay siyaasiyiinta dowladda madaxda ka ahi ka samayn lahaayeen qorshayaal ay muwaaddiniinta iyo nidaamka dowladnimada ee aan hore isu aqoon isku barayaan, shacabkana kaga beeri lahaayeen kalsooni la mid ah tii ay qabiilka ku qabeen, isla markaana ay isku dayi lahaayeen in ay baahiyihii uu qofku tolka ugu xilanayay qaranka ku wareejiyaan, waxa ay, taas lidkeeda, qabyaaladdii ka dhigteen sallaan ay kursiga ku koraan. Sidaa darteed, dowladda qudheedii baa noqotay ‘wax’ ay qabiilladu sidii ceelka iyo carshinta u kala hororsadaan. Aakhirkii, qabyaaladdu waxa ay noqotay hubka taliskii Kacaanku, in kasta oo uu bilowgii ku andacooday inuu la dagaallamayo, uu isticmaalay, ee uu bulshada ku kala dilay, dalkiina ku burburiyay. Dabadeed, waxa uu Afrax buuggiisa inoogu sheegayaa Soomaalida “[c]illaddeeda ugu weyn ee loogu dow galay ama ay u dhimatay waa cudurka qabiilka oo ku noqday dilaa aan dawo loo lahayn iyo dabin ay cid waliba si fudud ugu shirqooli karto.”<sup>31</sup> Yacni, marka laga tago in ay iyadu qabyaalad darteed wax isu yeesho, ayuu Afrax tilmaamayaa, waxa ay sidoo kale noqotay dabin cadowgeeda dibeddu ugu soo gabbado oo, ka dib markuu fahmay in ay tahay halka laga istaadho, uu ku kala qaybiyo, dabadeed kaga danqunsado. Kol kale, isaga oo Afrax is barbar dhigaya ‘Soomaalinnimada’ iyo qabiilka, ayuu ina tusayaa sida qofka Soomaaliga ahi aanu uga damqan, laakiin uu taas beddelkeeda “madaxa ugu ruxo” ama ugu qoslo, shisheeyaha *sinji* ahaan u caaya ee u bahdila; halka uu

---

<sup>31</sup> *Dal Dad Waayey iyo Duni Damir Beeshay*, bogga 64.



“haddii qabiilkiisa wax yar oo dhaliil ah laga sheego ka gubanayo oo uu dagaal la soo boodayo.”<sup>32</sup>

Haddii markan qaybaaladda aynu xumaanteeda iyo saamaynteeda taban ka hadlaynaa ay tahay heer bulsho, kol kale oo markan ka horreeyay waxa uu Afrax buugga *Maana-faay* inoogu sheegayaa—isaga oo ka hadlaya marxalad taas ka hoosaysa oo ah qofka oo qabiilkiisa lagu sidko, oo uu qaab dadban inoogu soo dhex marinayo fekerka Axmed iyo Sahra oo ka mid ah jilayaasha sheekada—in fekradda saxda ahi ay tahay “qof kasta qiimihiisu in uu isaga ku xidhan yahay, ‘ab’ iyo ‘isirna’ ayan waxna ku kordhin karin, waxna ka ridi karin.”<sup>33</sup>

Qabyaaladda marka laga yimaaddo, cilladaha kale ee dhaqanka ku aroora, ee uu Afrax innagu baraarujinayo waxa ka mid ah mushkilado qoyska la xidhiidha: gaboodfallada hablaha lagula kaco ee ay ka midka yihiin in waxbarashada iyo dhexgalka bulshada laga hor istaago oo, sidii dembiile maxkamadi xukuntay oo jeel la dhigay, guriga lagu hayo, dabadeedna, marka ay yara koraan guur lagu jujuubo oo niman aanay *iyagu* rabin lagu sandulleeyo.

Ugu horrayn, iskood bay arrimahani tacaddi u yihiin. Ta guri-kuhaynta marka ay noqoto, waxa inanta yar laga hor istaagayaa noloshii iyo degaankii ay aqoon iyo waayo’aragnimaba ka heli lahayd, waxana laga dhigayaa qof xabbisan oo aanay waxba u kordhayn: garaadkeeda ayaa gurigooda lagu haynayaa! Ta guurka qasabka ah marka ay noqotana, waa tacaddi labaad oo inantii yarayd, ee guriga lagu hayey, loo geysanayo; waxa mar kale lagu tumanayaa xorriyaddeedii ay masiirka nolosheeda iyadu ku dooran lahayd, oo waxa loo afduubayaa nin aanay rabin: Waa sidii qof laga kexeeyay qof addoonsanayay oo loo xareeyay qof kale oo addoonsada. Gaboodfalladani waxa ay ilmaha ku yeelan karaan saamayn maskaxeed iyo niyadeed oo laga yaabo in ay aayaha ku soo doogto. Sidaas iyadoo ah, haddana arrintan saamaynteeda dhinac kale ayuu Afrax innaga tusayaa. Waxa uu innagu baraarujinayaa in ay arrimahani keeni karaan dhibaato ka daran tii ay waalidka xalka ka raadinayaa—waa haddiiba ay xal ka raadinayaane—ka baqayeen in ay inantooda ku dhacdo. Sida inanta guriga lagu xabbiso ee xorriyadda laga qaadaa ay marka kowaad ee ay xorriyad hesho u noqon karto ‘shimbir qafis laga sii daayay’, waxa uu inoogu tusaalaynayaa qisada Iisha, oo ah jilayaasha buugga *Maana-faay* middood, oo ay walaalo yihiin Maana-faay (jilaaga kowaad ee sheekada, oo ah inanta uu

---

<sup>32</sup> Ist., bogga 54.

<sup>33</sup> *Maana-faay*, bogga 74.

buuggu magaceeda sito), taas oo ka dib muddo badan oo guriga lagu ilaalinayay, oo waxbarashadii laga dhaariyay, mar keli ah xadhkaha goosatay, gacan danbana aan lagu dhigin. Waxa ay Iisha ku danbaysay “Abaadirow soo aruuri inanta!” ... “Mindhaa sooma aruuriyo.”<sup>34</sup> Sidoo kale, waxa uu guurka qasabka ah inoogu tusaalaynayaa Maana-faay oo qudheedu khatar u gelaya guur lagu qasbayo dartii. Maana iyo Iisha waaqaca caadiga ah waxa ay u taagan yihiin boqollaal hablood oo ay dhibaatooyinkaas oo kale ku dhaceen, bal se aan xogtooda buugaag lagu qorin!

Haddii mushkiladaha hore ay yihiin kuwo la xidhiidha Soomaalida hiddaheeda, waxa kale oo jira mushkilado ay casriyowga iyo magaalowgu wateen oo uga soo tallaabay ummadaha kale ee ay is dhex galeen, kuwaas oo ay ugu horreeyeen gumaystayaashii dalku. Mushkiladaha waxa ka mid ah balwadaha iyo tumashada. Sida arrimahaas hore oo kale ayuu Afrax kuwan dhibaatooodana inoogu baraarujinayaa. Waxa uu isla buugga *Maana-faay* kol kale innagu tusayaa sida ay cilladahani bulshada Soomaalida ugu dhex faafeen, ee ay akhlaaq ahaan u baabbi’iyeen dadka ku dhex jira, isla markaana ay dadkaasi bulshada qaybaheeda kale u sadhaynayaan. Waxa aynu arkaynaa dad waayeel ah, oo rag iyo dumarba leh, oo halkii ay ka ahayd in ay da’yarta koraysa wanaag ku ababiyaan ka shaqaynaya sidii ay u ugaadhsan lahaayeen, ee ay u curdindhadhin lahaayeen, xumaanta ay iyagu walaqaanayaanna ugu soo dari lahaayeen. Arrinta xusidda mudan ee uu Afrax inoo sheegayaa, marka uu mushkiladdan ka hadlayo, waa in meelaha ay cilladdani ku faaftay ay ugu horreeyaan laamaha dowladda ee ay ahayd in ay iyagu cudurrada noocan ah cidhibtiraan. In kasta oo waqtiga ay qisadu ka hadlaysaa yahay mid hore, isla markaana uu buuggu “sheeko” yahay, haddana sawirkii ay berigaa qisadu bixisay ayaa weli ina hor yaalla, dhibaatooyinkii uu Afrax ka hadlayayna waa kuwo weli taagan, sidiina looga hadlo. Kolka laga yimaaddo in aanay dhibaatooyinkaas waxba iska beddelin, waxa kale oo qodobkani ina tusayaa arrin taas ka baxsan oo ah muhiimadda sheeka-faneedda oo ay dadka qaar moodaan “male’awaal” aan run ka turjumayn, bal se dhab ahaan ah muraayad si rasmi ah u muujisa muuqaalka bulshada.

Mushkiladaha uu MD Afrax ka hadlayo ee aynu xagga sare ku carrabaabnay, sida la dareemi karo, waa kuwo guud oo laga yaabo, iyada oo ay suuragal tahay in degaannadu ku kala duwan yihiin, in ay Soomaalida oo dhammi, meel ay joogtaba, si uun u wadaagto; ha se yeeshee qodobka siyaasadda ee

---

<sup>34</sup> Isla tixraaca, bogga 7.

aynu hoos ku taaban doonnaa, in kasta oo qaarkood laga siman yahay, sidaas way ka yara duwan yihiin. Sababtu waxa ay tahay, mushkiladaha siyaasaddu waxa ay la xidhiidhaan dowladnimo iyo maamul, sida la og yahayna Soomaalidu ku ma midaysna hal dowlad, oo waxa ay u qaybsan tahay, ama hoos tagtaa, dowlado kala geddisan. Sidaa darteed, dhibaatooyinka siyaasadeed ee aynu xusaynno inuu Afrax ka hadlay waxa ay si gaar ah u dul istaagayaan Jamhuuriyaddii Soomaaliya—ama ugu yaraan ciddii magaca dowladdaas beri ku midaysnayd.

Haddaba, marka siyaasadda “Soomaaliya” laga hadlayo, dhibaatooyinka sida joogtada ah looga hadlo, ee qof kasta oo faalleeya afkiisa laga maqlo, kuwaas oo aynu qoraallada Afrax laftoodana ka akhrisanaynno waxa ka mid ah: qabyaaladda maamulka iyo dowladnimada ku milantay, oo aynu kor ku soo tilmaannay; musuqmaasuqa aan xadka iyo xishoodka lahayn ee nidaamka raacay; kursi-jacayl iyo danaysi; ku-tumashada xorriyadda muwaaddiniinta, qowl iyo ficilba, ikk. Waxa uu, haddaba, Afrax buugga *Dal Dad Waayey iyo Duni Damiir Beeshay*, oo ah qoraalladiisa midka sida ugu faahfaahsan arrimahan uga hadlaya, inoogu sharraxayaa in cilladda ugu weyn ee dhammaan dhibaatooyinkan siyaasadeed iyadu dhashay ay tahay ‘gadhwadeen-xumo’. Isaga oo inoogu tusaalaynaya taliskii Kacaanka ayuu inoo sheegayaa: “Sidaas ayay taariikhdu inoo bartay hadimada garwadeenku halaagga ay ummad dhan u horseedi karto, si kasta oo ummaddaasi dadaal isugu daydo.”<sup>35</sup> Isla kolkaas, waxa uu inoo faahfaahinayaa sida aanay mushkiladda ‘gadhwadeen-xumadu’ ugu koobnayn hoggaanka siyaasadda oo keli ah, bal se ay, si taas la mid ah, ugu faafsan tahay dhammaan kooxaha bulshada gadhwadeenka u ah oo ay ku jiraan ‘gadhwadeenka dhaqaalaha’ iyo ‘gadhwadeenka fekerku’. Gadhwadeen-xumadaas dhinacyada bulshada oo dhan ku baahsani, ayuu Afrax ina leeyahay, waa ta Soomaaliya u horseedday in ay burburto, isla markaana, burburkii ka dib, ka hor taagan in la heshiiyo, oo la isku afgarto sidii nidaamka dowladnimo loo soo celin lahaa.

Sidaa darteed, gaar ahaanna inta qodobkani tabinayo darteed, qalinka Afrax wuxuu gutay sifihii qoraaga wanaagsan ee aynu ku ballaysinnay isla qodobkan.

---

<sup>35</sup> *Dal Dad Waayey*, bogga 77.

## Gebagebo

Qoraalkani wuxuu isku dayay in uu xus u noqdo marxuun Maxamed Daahir Afrax. Maaddaama sida ugu habboon ee qoraa loo xusi karaa ay tahay in la akhriyo, la faaqido, lana nooleeyo waxqabadkiisa, qoraalkani jidkaas buu qaaday. Wuxuu isku dayay in uu muujiyo kaalintii uu Afrax ugu jiray ummaddiisa. Si taa loo xaqiijiyo, qoraalku wuxuu kaashaday waxsoosaarka qoran ee Afrax, intiisa la heli karo; kaas oo u maragfuray in Afrax ahaa qoraa gutay xilkii ka saarnaa qoraalka Af Soomaaliga, oo qaadhaan sheeggan ku darsaday taabbagelinta erayga qoran, intii ka danbaysay hirgelinta Far Soomaaliga.

Waxa la is dul taagay dadaallada suugaantiisa iyo faaqidaadihiisuba u hureen Af Soomaaliga. Waxa kale oo taa lagu daray abaabullada iyo agaasinka qof ahaaneed ee uu Afrax gacanta ka geystay, iyadoo tusaale loo soo qaatay wargeysyadii uu soosaaraha ama tifaftiraha ka noqday iyo madilihii uu asaasay ama yagleeliddooda qaybta ka ahaa markii danbana uu hoggaamiyay, ee dhaqanka iyo afka u adeegayay. Waxa, sidoo kale, qoraalka waax ka ah faallayn lagu sameeyay qaar ka mid ah qoraalladiisa, iyadoo diiradda la saarayo sifada cid kastaa, gaar ahaan qalinleyda, ay kaga dayan karto oo ah sida uu qoraa xilkas ah u ahaa, ee uu dhaqanka Soomaalida u metelay, isagoo intiisa san boorrinayay intiisa xunna naqdinayay; iyo sida uu mushkiladaha bulsheed iyo siyaasadeed tooshka ugu ifiyay.

Marka la soo koobo, waxa la rejaynayaa in qoraalkani akhristaha baro Afraxa dhallinyarnimadiisii ilaa goortii uu allaysanayay u weernaa gobaynta ummaddiisa iyo, gaar ahaan, taabbagelinta qarannimo milge leh—hagaajinta dowladnimo iyo suubbinta dhaqan ilbaxnimo—taas oo aan ka dhicin halgankii xornimaddoon ee aloosnaa kolkii uu ifka yimi.

Dhan kale, qoraalkani ma deedifaynayo in ay jiraan meelo uu Afrax taabtay se u baahan in la sii daraaseeyo—tusaale ahaan cilmibaadhista fanka Soomaalida. Waxa xusid mudan in fanku Afrax ugu jiray kaalin muhiim ah. Bilowgii nolosha, iinsaanku waxa ay hadba mar ku baraarugayeen baahi barbarkooda taal. Sida Afrax ku doodayo, baahida faneed waxa ay ka mid ahayd kuwii ugu horreeyay ee bani'aadanka la soo gudboonaaday, lana jaanqaaday korriinkii aadmiga. Fanku wuxuu ahaa—ilaa haddana yahay—agab xogta maalinlaha ah lagu kala qaato, lagu kaydiyo, isla markaana la isku illowsiiyo hawlaha kakan ee maalintaa lagu shuqlan yahay.

Haddaba, fanku wuxuu dadka ugu jiraa kaalin lagamamaarmaan u ah jiritaankiisa, waana mid ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee noloshu ku dhisan tahay, waayo waa agabka keliya ee waaritaanka leh ee iinsaanku isku cabbiro, isku qeexo ama ku sawiro degaanka iyo waayaha ku xeeran. Taa darteed buu Afrax ugu qalabqaatay baadhitaan—aan hortii iyo dabadiiba cidi u guntan— kaas oo quseeya fanmasraxeedka Soomaalida. In kasta oo ay jiraan qoraayo farakutiris ah oo si guud ugu dhabbagalay fanka Soomaalida, guud ahaan, haddana fanka Soomaalida laga ma hayo kayd qoran oo la isku hallayn karo, waana mawduuc dihin oo u baahan in baadhis qoto dheer lagu sameeyo. Xog aad u ballaadhan ayaa ku maqan sooyaalka masraxa Soomaaliga ah. Sidaas oo ay tahay haddana, cilmibaadhisaha kala ah: *Fanmasraxeedka Soomaalida iyo نافذة على الإبداع في منطقة خليج عدن* wuxuu Afrax ugu jilibdhigay in uu ku faaqido fanka Soomaalida guud ahaan, gaar ahaanna fanmasraxeedka. Run ahaan waa sees waxtar leh oo laga anbaqaadi karo darsidda fanka Soomaalida. Haddaba, qoraalkani wuxuu soo jeedinayaa in meelaha ugu mudan ee cilmibaadhisyo dhammays ah tebayaa ay yihiin: Waxqabadkiisa badda ah ee aan laga geyoonayn iyo, dabcan, waxqabadyada baaxadda leh ee qoraayada kale. Sidoo kale, guud ahaan, meelaha kale ee baadhitaanka u baahan waxa ka mid ah: masrax-hiddeedkii hore ee Soomaalida ee ka horreeyay masraxa casriga ah—madaddaaloooyinkiisii, murtidiisii, dheeliihiisii, xilliyadii uu bilaabmay iyo isbeddelladii ku dhacay—iyo fanka rooxaaniga ah oo bulshada Soomaalida ugu jira kaalin muhiim ah oo aan la dhayalsan karin. Waxa kale oo baadhis mudan masraxa Soomaalida ee burburkii ka danbeeyay. Kol kalana, waa in daraasadaha Afrax ku faaqiday fanka Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaanna fanmasraxeedku, ay leeyihiin goldaloolooyin u baahan in la gufeeyo. Meelaha qabyatirka u baahan waxa ka mid ah fanka erayga, hagidda iyo dulucda. Sidoo kale, waxa daraasad u baahan muusig-hiddeedka Soomaalida oo aan laga hayn xog faahfaahsan, marka laga tago xog korkaxaadis ah—sidoo kalana noqon karta meel laga raadraaco cilmibaadhista—oo Afrax ka taataabtay. Ugu danbayn, qoraalkani wuxuu baraarujinayaa in sheekafaneedda Soomaaliduna tebayso baadhitaan gun iyo baar ah, iyo, aadkaba, in la qabatimo dhaqanka daraasaynta iyo faaqidaadda.

# **LIFAAQ**

## QORAALLADA AFRAX QAYB KA MID AH

- 1) *Maana-faay*, Muqdisho, Wakaaladda Madbacadda Qaranka, 1981.
- 2) *Galti-macruuf*, Muqdisho, (taxane ahaan) *Xiddigta Oktoobar*, 1980
- 3) *Guur-ku-Sheeg*, 1975.
- 4) *Fan-masraxeedka Soomaalida: Raad-raac Taariikheed iyo Faaqidaad Riwaayado Caan-baxay*, Nayrobi, 1987.
- 5) *Dal Dad Waayey iyo Duni Damiir Beeshay*; London; Halabuur Communications, 2004.
- 6) *Durbaan Been ah (Riwaad)*; Muqdisho; 1979.
- 7) "Iftiimin Suugaanta Soomaalida: waxa ay tahay, waxa ay tarto iyo waxyaha ay ka koobanto," *Proceedings of the Conference on the 40th Anniversary of Somali Orthography*, AGA, Djibouti, 2012.
- 8) "Dunta Ismaamul-hiddeedka Ciisaha," *HAL-ABUUR*, xidhmadii 4aad, tirsiyadii 1&2, 2009.
- 9) "Dulleynta Soomaalida iyo Digniinta Shisheeyaha: Goormay Soomaalidu ku Baraarugi Doontaa?" *Wardheer News*, Dec. 06, 2011.
- 10) "Maxay ku fadhidaa maxayse nagu boorrinaysaa: Maalinta Buugga iyo xuquuqda Hanti-maskaxeeddu," *Wardheer News*; Apr. 22, 2021.
- 11) ""Qaran iyo Qabiil": Riwaayad Digniin Bixisay," *Hal-abuur*, xidhmadii 1, Tirsi 1, Xagaa 1993.
- 12) ""Xorriyo Nin Geyaa" Goormuu Dhalan?: Faaqidaad-masraxeed Darsaysa Riwaayaddii Xorriyo," *Wardheer News*, Jul. 05, 2010.
- 13) Nida Al-Xorriyah [نداء الحرية], 1976
- 14) Nadaraat fii Al-Thaqaafah Al Soomaaliya [نظرات في الثقافة الصومالية]; Sharjah, the Culture and Information Department, 2002.
- 15) Diraasaat Naqdiyah Wa tathqiifiyah [الدراسات النقدية والتثقيفية].
- 16) Naafidatu calal Ibdac fii Mandiqati Khaliiji Cadan [نافذة على الابداع في منطقة خليج عدن "دراسات في الثقافة والفن في الصومال وجيبوتي واليمن"]; Qaahira, Hiil Press; 2020.

- 17) *Between Continuity and Innovation: Transitional Nature of Post-Independence Somali Poetry and Drama, 1960s – The Present* (PhD thesis); SOAS; 2013.
- 18) *Rural Imagery in Contemporary Somali Urban Poetry: A Debilitating Carryover in Transitional Verbal Art*; 1999; SOAS Literary Review.
- 19) "The 'Abwaan' as Beacon: the centrality of the message in Somali literature with especial reference to the play 'Shabeelnaagood'"; *Journal of Horn of Africa*, 2004, Vol. 22, pp. 1-63.
- 20) "Towards a culture for peace: Poetry, drama and music in Somali society"; *Journal Accord*; 2010, Vol. 21, pp. 72-74.
- 21) "The Mirror of Culture: Somali Dissolution Seen Through Oral Culture" in (ed. Ahmed I Samatar) *The Somali Challenge: From Catastrophe To Renewal?*; Lynne Rienner Publishers, 1994.
- 22) "Theatre as a Window on Society: Opposing Influences of Tradition and Modernity in Somali Plays," *Hal-abuur*, Vol. 2, Nos. 1&2, 2007.
- 23) "'Nation of Poets' or Art-loving People? The Role of Literature in the Present-day Somali Society," *Hal-abuur*, Vol. 1, Nos. 2&3, 1993/94.
- 24) "Opposing Influences of Tradition and Modernity in Contemporary Somali Literature," *Wardheer News*, May 01, 2020.
- 25) "Paramountcy of Alliteration in Somali Literature," *Wardheer News*, Feb. 22, 2020.

### **Sheekooyin gaagaaban:**

- 26) Ambad
- 27) Ha Iman lahaydaa
- 28) Tala-seeg
- 29) Laxdat Atajallii
- 30) Layaali Haafaaniyah

### **Faallo Buug:**

- 31) "Gorfeynta Buugga: Gaso, Ganuun iyo Gasiin: Qiso Jid-bixiyeen ah," *Wardheer News*, Jun. 07, 2020.
- 32) "A Shield of Coolest Air," *Hal-abuur*, xidhmadii 1, Tirsi 1, Xagaa 1993.
- 33) "HAL-KARAAN: Maansadii Hadraawi, 1970-1990," *Hal-abuur*, xidhmadii 1, Tirsi 1&2, Dayr/Jiilaal 1993/1994.



**Baroordiiqyo uu qoray:**

- 34) Maxamed Cabdi “Gandi”: Haldoor kaloo God u hoydey; *Wardheer News*; May 28, 2021.
- 35) Nabad galyo Macallin Guush, *Hal-abuur*, Tirsiga 4-aad, 1995.
- 36) Qudbi-suugaaneed Kaloo Galbaday: Nabadey Saalax Xaashi Carab (1955–2010); *Hiiraan Online*; August 26, 2010.
- 37) Xaamud Jaamac Xuseen: Xeeldheere Xusuus Mudan; *Wardheer News*; Sep 2, 2019.
- 38) Gaariyena ma Naga Tagey!: Lix haloo u wada gaar ahaa goconayaa mooyi!; Oct 7, 2012.
- 39) Farewell Xasan Shiikh Muumin: an Abwaan of Singular Stature; *Hal-abuur*, Vol 3, Nos. 1&2, 2008.

**Buugaagta aan weli la daabicin:**

- 40) Maadeys: Faaqidaad-masraxeed
- 41) Classification of Somali Literature
- 42) The changing Shape of Somali Poetry